

# Sidee u diyaarsantahay haddii hiitarka uu qaboobo feriijkana uu kululaado?

Haddii ay dhacdo duufaan daran, carqalad IT ama isku dhac hubaysan, waxa aan u qaadanno si fudud ayaa laga yaabaa inay shaqeen wayso. Sidaa darteed, way fiicantahay in la diyaar garoobo. Waxa ugu muhiimsan waa in la helo cunto, biyo la cabbo, kuleyl iyo fursad aad ku hesho macluumaad muhiim ah. Haddii dhibaatada ama dagaalku yimaado, dhammaanteen waxaan u baahanahay inaan is caawino.

## Mas'uuliyad la isla wadaago

**Inteena ugu badan waxaan la qabsanay adeegyada bulshada oo inta badan had iyo jeer shaqeynaa. Swedan waxey ka amaan badan tahay wadamo badan. Laakin waxaa jiro waxyaalo khatar ku ah nabadgalyadeena iyo madaxbanaanideena.  Haddii aad diyaar garowdo, waxaad naga caawin doontaa inaan si fiican ula qabsanno cadaadiska adag.**

Cimilo diiran ayaa ka dhigaysa duufaannada, daadadka iyo kaymaha oo gubta kuwo caan ah oo lamid ah. Isku dhaca ka jira adduunka intiisa kale waxay sahmeyn ku yeelan karaan soo dejinta waxayna sababi karaan cunto yaraan iyo daawo. Caabuq daran oo qabaan bukaanno badan ayaa u horseedi kara yaraanta shaqaalaha adeegyada muhiimka ah Carqaladeynta nidaamyada IT-ga ayaa sahmeyn ku yeelan kara korontada.

Degmadaadu waxay mas'uul ka tahay inay hubiso in, iyo waxyaabo kale biyo siin, daryeelka waayeelka. adeegyo samatabixin iyo sidoo kale iskoolada inay sii shaqeeyaan hadii ay dhacdo dhibaato bulsho. Laakin sidoo kale waxaad u baahantahay inaad isu diyaariso naftaada si aad u maareyn karto xaalad adag, iyadoo loo eegin waxa sababay. Rog bogga oo waxaad ka heli doontaa talooyin ku saabsan waxa wanaagsan ee guriga lagu haysto.

## Diyaari gurigaaga

Dhibaatada bulshada dhexdeeda, caawimaad ayaa marka hore la sii doonaa kuwa aadka ugu baahan. Dadka badankood waa inay u diyaar garoobaan inay is daryeelaan in muddo ah. Isu diyaari dhawr maalmood, illaa toddobaad ama ka badan haddii aad fursad heysato. Ku habee u diyaarsanaanta gurigaaga waxa ku habboon adiga iyo kuwa aad jeceshahay. waxyaalaha qaarkood isugu keen, oo qaraabada iyo deriska kala hadal sidaad wadajir wax ugu diyaarin kartaann.

### Talooyin!

Buug-yaraha Haddii xiisadda ama dagaalku yimaado, waxaad ka aqrisan kartaa waxyaabo badan oo ku saabsan sida dhibaatooyinka kaladuwan ee bulshada ay u saameyn karaan nolol maalmeedkaaga iyo waxa aad adigu sameyn karto oo aad uga fikirto inaad si wanaagsan ugu diyaar garowdo. Akhri QR koodhka sifo aad ugu akhrido waraaqda somaali ahaan.

Myndigheten för samhällsskydd och beredskap

## Ilaa intee diyaarsantahay?

Waa kuwan qaar ka mid ah tilmaamaha guud oo ku saabsan waxyaabaha ku wanaagsan in guriga lagu haysto markay  jiraan dhibaatooyinka bulshada. Adeegso waxa adiga iyo kuwa aad jeceshahayba ku habboon, waxyaabaha qaarkood isugu soo ururso oo midba midka kale ha amaahado.

- [ ] Reediyow ay ku shaqeeyaan baytariyada ama unugyada wareega/ qoraxda. Isticmaalida raadiyaha gaariga.
- [ ] Tooshka iyo tooshka madaxa lagu xirto oo leh batiryo dheeraad ah.
- [ ] Nadiifi gasacadaha iyo dhalooyinka si aad ugu keydiso oo aad biyo ugu soo aruuriso.
- [ ] Cunto lakeydin karo firinjiyeer/qaboojiye la’aan oo si toos ah loo cuni karo ama loo karin karo biyo la’aan.
- [ ] Kariyaha stoofka iyo shidaalka. Waxaa doorbidan in dibedda lagu isticmaalo.
- [ ] Bacaha lagu seexdo, busteyaal iyo dhar yara kulul, dharka bustayaasha ka sameysan.
- [ ] Dirimayaal.
- [ ] Shumacyo, wareega shumac ah.
- [ ] Nalalka kerosene iyo shidaalka, sida saliidda laambadda ama gaaska. Xusuusnow inaad hawo fiican heysato.
- [ ] Ilo kale oo kuleylka ah oo ay ku shaqeeyaan kerosene, LPG, naaftada ama qoryaha lashito.
- [ ] Farmashiyaha guriga iyo waxyaabaha nadaafadda (sida masaxa qoyan).
- [ ] Baytariyada dheeriga ah, keydiyaasha dabka oo la jaajar gareeye.
- [ ] Lacag caddaan ah haddii nidaamyada lacag bixinta ay shaqeyn waayaan.
- [ ] Liiska waraaqaha oo leh lambarro taleefan oo loogu talagalay qoyska, ehelka, deriska, degmada, adeegga badbaadinta, bixiyaha korantada, isbitaalka.




### Biyo

Biyo nadiif ah oo la cabbo ayaa muhiim ah. Filo ugu yaraan saddex litir qofkiiba qof weyn maalintii. Haddii aadan hubin tayada, waxaad u baahan tahay inaad kar karisid biyaha.

### Cunto

Waa muhiim inaad guriga ku haysato cunto aad ka heli karto tamar fiican. Adeegso cunto waarta oo si dhakhso leh loo karin karo, waxay u baahan tahay biyo yar ama waa la cuni karaa iyadoo aan la karin.

### Kululaynta

Haddii korontadu go’do inta lagu jiro xilliga qabow, gurigu si dhakhso leh ayuu u qaboobayaa. Qol ku soo ururi, bustayaal ku dheji daaqadaha, sagxadda ku dabool rooga oo aqal ka dhis miis hoostiisa si aad u kululaato. Ka fikir khatarta dabka haddii aad heesato shumac.

### Isgaarsiinta

Haddii ay dhacdo khatar ah, waxaad u baahan tahay inaad ka hesho macluumaad muhiim ah mas’uuliyiinta mas’uulka ka ah, ugu horreyna Sveriges Radio P4 Iyo Telefishanka Sveriges Waxaad sidoo kale booqon kartaa krisinformation.se Ama wac khadka taleefanka ee macluumaadka 113 13. Xaaladda degdegga ah, waa inaad wici kartaa 112 Sidoo kale maskaxda ku hay inaad u baahan tahay inaad la xiriiri karto qaraabadaada.

www.dinsäkerhet.se/kris-och-krig/

Myndigheten för samhällsskydd och beredskap